## 40 - AQAL

**Axmed Nuur**

Aqalka guriga beynu ka doodeynaa.  Aqal waa aqalkii miyiga, aqalkii magaaladuna wuu soo geli doonaa oo hoos beynu ugu dagaandegi doonnaa maxaa yeelay soomaalidu aqal miyi iyo aqal magaalaba way leedahay iyo aqal beereed. Aqalka beereed gooniyaniyaan u soo baari doonnaa, laakiin maanta waxaynu ka hadli doonnaa aqalka miyiga iyo kan magaalada oo aad isku dhex galay. Raga ka doodaya waxaa ugu horreeya ninka la yiraahdo Daahir Afqarshe, Fiqi Buraale, Dhegaweyne, Cali Muddiir, Axmed Nuur oo isna warka qeybinaya.

Waxaa jirta in maalin dhoweyd aqalka hoos ahaan inaynu uga doodnay, maanta waxaynu ka duuli doonnaa aqalka qeybihiisa guud. Dooddeenna koowaad waxay noqon doontaa, horta aqalka miyigu imisuu u qeybsamaa? Su’aashaas jawaabteeda waxaan u horreysiinayaa Daahir Afqarshe.

**Daahir Afqarshe**

Axmed Nuurow waad mahadsan tahay. Aqalka soomaalidu ay dhisato waa qeybo badan, qeybihiisaa badan, marka u horreeya waxaa loo yaqaannaa Saari iyo Gurgur. Saari waxaa la yiraahdaa aqalka intaa dhisan ee muuqaneysa, gurgurkuna waxa hoos yaalla. Saarigaasaa laba u qeybsama Qabax iyo Ded buu noqdaa, Qabax waxaa la yiraahdaa wixii qori ka yimi ee aqalku ku taagan yahay, markaasuu leeyahay Dhig iyo Udub iyo Lool iyo dhigehaa iyo loolka mid u dhexeeya ee isna la yiraa Jalalooti. Intaas waa intuu ku taagan yahay aqalku, haddii sare loo qaadayo oo uu intaa ka weynyahayoo aqallada aroosyada iyo waxaas ah tiirarbaa ka hooseeya dhigahaa iyo waxaa lagu dheereeyey oo waa marka aqlka cirkaa tegeyaa ee sare isu taagayee arladoo dhan ka dheeraanayee labaderyaalaha noqdee aqalkii xaggan loo soo fooraarinayee leyska soo wada hor keenaya oo tiirarkaasina waqtiwaqti bey galaan markii aqalka la banaanadinayee la doonayo in laga sameeyo aqal weynoo aroos ah, amase dadka beeraleyda ahee aan guurguureynin, aqalka dadka badan seexdee xoolaha qaar xitaa ay u hooyaan ee aan weligii la rareynin ee iska ah dunida dhan baa tiirarkaasi soo galaan.

Waayahay, waxa alaale wixii dusha laga saaraana Ded baa la yiraahdaa oo wixii lagu deday, ded qof waliba waa yaqaanaa oo waa kii wax lagu awday, markaa kaasina wuxuu u kala kacayaa wax caws laga sameeyey iyo saanta xoolaha oo la yiraa Lamma, lo’duba ha u badatee, geeluna wuu jiraa. Saantaas iyo wixii caws laga sameeyey yuu u badan yahay dedkaasu iyo wax Mayrax laga sameeyey oo Kebdo la yiraahdo iyo wax maro laga sameeye amase haraga xoolaha hadda dhashay oo waa geedkan la yiraahdo Aloolka oo duur yaryar oo la safay iyo xariggaa oo leysku sameeyayoo xariggu ama yahay haragaa xoolahee aan sheegay oo lagu qurxiyayoo oo leyn-leyn loo sameeyey ama maradii oo la soocay oo dabadeedna lagu tidcay bahalkaas oo noqonaya geed aamina oo sida saanta oo kale ah, quruxna leh, wax raagayana ah oo cawska ka lixaad roon oo alaabada ay haweenka aad u qiimeeyaan ka mid ah. Marka aloolkaa iyo saantaa iyo cawskaa iyo

meyraxdaa, afartaa jaad ee laga sameeyey yaa ded la yiraahdaa, xarigguna waa ka dhexeeyaayoo dabadeed wax isku xiray waa xarig. Intaas aan ka sheekeynay waa inta saariga la isku yiraahdo ee aqaku ka dhisan yahay. Gurgurna waa wixii lagu manaafacaadee hoos yaalla oo markaasuu isaguna u kala kacayaa nooc-nooc.
Bal horta qabo haanta, ama ha lagu lusho ama biyo ha lagu shubto iyadaa hormuud u ah. Waxaa ku xiga ubbooyinka subaga lagu shubto ee lagu kaydsado ee aan weligood xumeyninee galbeed ka baxa ee la xarrageysiiyee sida quruxda badan loo sameeyee la safi aqalka wanaagsan ee qaaliga ah, baa ku xiga.
Waxaa ku xiga qumbaha iyo tebedda oo markii hore inta aan la baran waxa maacuunta ah ee inooga yimid dhulka ajnabiga, wixii aan subagga ku shuban jirneen ku keydsan jirnay waa qumbaha iyo tebedda. Tebedda wxaa laga sameeyey harag ari, haragii ariga uun baa loo sameeyey gilgilo saddex ahoo sidaa la isku weydaariyey, markaasaa camuud laga buuxiyey, haragii xaggii qallinkaa la sarreysiiyey, xaggii dhogorta lahayd oo la xiiray oo la wanaajiyey yaa markaa la hooseysiiyey, camuud baa laga buuxiyey, geed baa laga laadlaadiyey, markaasaa camuuddii lagu shubay sidii haruurka marka jawaanka lagu shubayo markaasey simantay, markaasey saa ku qallashay, markaasaa halaas inta la hufay oo la wanaajiyey oo camuuddi laga dhameeyey oo subag kale markaa lagu dhaqdhaqay ayaa sidii loo dabooli jiray ee looga ilaalin lahaa wax u taga subagga saas uun baa halkaa loogu shubaa. Kaa waxaa u caadaa subagoo iska kulu laguma shubo ilaa wixii saan weeyaane oo isaguna cilmiyan ayuu ku dhisan yahay. Bal hadda waxay ila tahay raggii kalena inuu u diyaar yahaye yaan ka laasanine, saaxiibkey Fiqi Buraale u dhiib.

Axmed Nuur — Haddana waxaan u wareegayaa dhinicii Fiqi Buraale oo isagu gurigaa baadiyaha dhowr aroos ku galay oo nin aqoon dheeraad ah u leh guryaha miyiga iyo qeybihiisa inta uu u kala baxo. Fiqi Buraalow, guriga miyiga, Daahir waa maqleysay intuu u kala qeybiyey bal adiguna qeybahaaga iyo sidaad u arkeyso, inkastaad reer Nugaaleed isla tihiin inaad kala geddisan tihiinoo adigu dhowr meeloodaad aroos ka gashaye maxaad oran lahayd.

Fiqi Buraale — Intaa uu Aw Daahir yiri ee magaca guud ah anigu waxba ku darimaayo. Waan la qabaa Aw Daahir sidaa uu yiri, hase ahaatee waxaan qeybin hayaa udubada. Laba waxaa la yiraahdaa laba udub xoog waa labada foodda la isku saaro, midna waxaa la yiraahdaa udub dhexaad oo waa ka dhigta dhexdiisa lagu mudo, laba udub oo kalaa jira oo la yiraa udub doceed oo midba dhinac isagana ka qabta, udub raareed ayaa jira oo isaguna dhigta raarta lagu waxeeyo. Lixdaa markay noqdaan waxaa raaca haddii aqalku duubasho culus leeyahay oo gabadha gaarida ah ee aad uga digtoon in aqalkeedaas uusan xumaanin duubishidaa faraha badan waxay u sameysaa qori la yiraahdo Heenso-raar oo wuxuu leeyahay laba farraar oo waaweyn, markaasaa saas loo saaraa duubashida siyeyna ciiddaas hoose uusan aboor uga soo gaarin

amase bahashan Cawagudda la yiraa aysan u soo gaarinoo duubashidaas ayan wax ka cunin, duubashidaasna waxaa loola dan leeyahay waa mid raasamaal dambaa laga rabaayoo maalmaha ay tahay feestada ama damashaadka ama aroosba la sameynaayo ama gabadha gaarida ahi gabadh u joogto oo ay leedahay marbaad wax dhisi doontaaye sii keydi yaa duubashidaasna looga dan leeyahay, Udubadii intaasaan u qeybiyey.

Waxaan kaloon raacinaayaa dhigaha qabaxa ah, qabaxaa sidaa Daahir u sheegaan la qabaayoo waxaa weeye Lool iyo Dhig. Loolku waa kuwa duurka laga sameeyee sidaa isugu soo laabma, laba noocba waa lagu maraa marka dushooda la maro, xarig xoolaad waa lagu maraa dhigta iyo loolkaba, xarig la sameeyey oo cad oo xagga galbeedka u badan oo hadhow la asli doodana waa lagu sameeyaa oo waa lagu maraa. Marka qabaxaasi wuxuu ka sameysan yahay udubka iyo loolka iyo dhigaha, inta qabaxa la yiraahdo waa intaas qoriga ka sameysan. Haamihii xaggoodii u kici maayo, wuxuu ka sheegay Aw Daahir kuwa ugu muhiimsan waxa weeye haanta. Haanta dhowr nooc ayaa loogu kala dhawaaqaa, marka la dhaaminaayo waxaa la yiraahdaa dhoon horaad, oo laba ah iyo laba dhoon dambaad oo intaas waxay ka qeyb galaan dhaanka xaggiisa. Waxaa kaloo jira haan kale oo la yiraahdo haanta lagu lusho oo iyaduna sida reeku u kala xoolo badan yahay, qolo aagaan bey ku lulataa, qolo dhikil bay ku lulataa, qolo waxay ku lulataa haantaa dhoon horaadka oo kale oo wanaagsan oo ama qabo ah ama cargeeg ah oo si wanaagsan loo aslay oo loo xooleeyey oo fiican ayaa reerka xoolaha abdana leh ee ee lo'da iyo ariga leh, sida reerkaas u kala xoolo badan yahay ayaa haantaana loogu lushaayoo iyaduna waa waxay la eg tahay kuwa dhoon horaaddadaasoo kale. Kuwa yaryar ee aan dhikisha ku sheegayna waa kuwa gabdhuhu ugu heesaan “Haanyahay dhigdhiga dhaban yar waagii dharaaryowyey soomana dhanaanaatid”. Marka intaas ayaan uga baxayaa, rag badan oo murti badan hayana ay iga dambeeyaan ama gabdho badan ay halkan joogaan, waana mahadsan tahay.

Axmed Nuur — Maanta aad iyo aad baynu u nasiib badannahay, waxaa nagala soo qeyb gashay Maryan oo iyaduna waxay qeyb weyn ka qaadan doontaa dooddan ku saabsan aqalka iyo alaabtiisa waayo wey nooga xogogaalsan tahay waana gabar, inkastoo ay raggu gabdhaha wax badan ka xoogeen oo la yiri ilbaxnimada hadda waa ilbaxnimada raga oo haweenku waxba kuma leh, weli annagu waanu dhacannahay oo sidii baan u dhacannahay, haddana waxaad mooddaa in aynu dhacayno oo qalabkoodii iyo alaabtoodii aan ka boobeyno oo aynu ka bi'ineyno oo six un wax uga sheegeyno, laakiin nasiib wanaag dooddii maanta haddii ay nagala soo qeyb gashay Maryan, bal adiguna Maryaney guriga miyiga imisaad u qeybin lahayd? Odayaashu waxay u qeybiyeen saari iyo gurgur. Saaridii bay kala qeybiyeen oo waxay ka dhigeen waxa la yiraahdo qabax iyo ded ayey ku sheegeen, dedka alaabaa lagu sheegay oo waxa wax lagu dedo waa leysla garanayaa, qabaxna

waa dhigihii iyo udbihii iyo wixii kale hoos yiil ayaa lagu sheegay. Haddba bal Maryaney adiguna maxaad ka oran lahayd gurigii oo laba loo qeybshay, saari iyo gurgur, gurgurku waa tira badan yahay.

Maryan Sida runtaa raga maanta meeshaan isugu yimid oo ay ka mid yihiin Aw Daahir, Fiqi Buraale, waxaan u maleynayaa inkastoo aan gabar ahay inaan haddana la baratami karin mar haddii loo kaco xaggii dhaqanka soomaalida, maxaa yeelay waa midoo weyga aqoon badan yihiin midda kalena waa iiga waaya aragsan yihiin. Marka sida ay u qeybiyeen oo ay labadaa magac ugu kala qeybiyeen ayaan aniguna sida runta ah ku waafaqsanahay. Sida la wada ogsoon yahay aqalka soomaalida waxa weeye wax hidda ahaan aan ka soo garnay ka ab- ka ab, inkastoo aqalkaas aasaaskiisa iyo dhisiddiisa iyo abuurintiisa ay keeneen haween, haddana raggu waa kan ku dhaqma oo ku hoos jira oo shey shey bay u yaqaaniin, marka sidaa daraadeed labadaa oday sidey u qeybiyeen ayaan aniguna ku go’aa.

Axmed Nuur Waxaa kaloo jira oday kaloo isaguna aad iyo aad aqoon u leh, waxa waaye Dhegaweyne, Bal Dhegaweynow adiguna maxaad oran lahayd, odayaashii waad maqleysay oo gurigii labay u qeybiyeen, maxaad ku dari lahayd?

Dhegaweyne Hadalka hambadiisii ayaad isiisoo meel aan uga tago garan mayo, markay ila soo gudboonaato ayaanse hambada ku siin doonaa, waa mid, tan kale aqalka la sheegayey iyo sheyba meeshuu anfaco ee magac ku leeyahay yaan kala sheeg-sheegayaa.

Axmed Nuur Waa garoo waan kugu celin doonaa, anigaaba ruuxayga sii qeyqeybin doona guriga, erayadaan hadda idinweydiiyey ayaan idin sii wey-weydiin doonaa.
Bal aan ka hadalno qeybaha saarida, waa laga hadlay maxaad ku dari lahayd.

Cali Mudiir Meesha dhoon horaad laa yiraahdo ama dhoon dambeed, anigu waxaan u aqaanaa kalsaar iyo dambeed, labadaba in aan u aqoonno weeye.

Axmed Nuur Caliyow waxaan kuugu sii darayaa ineynaan sidaas uga hari doonin, haamaha iyo dhoonta qeybaheeda iyo guriga ruuxiisa saas uga sii hari mayo waana idinku celin doonaa laakiin hadda waan guud mareynaa misna hoos ayeynu u degeynaa erayeray baynu u degeynaa, udub maxaa la yiraahdaa, udub dhexaad maxaa la yiraahdaa tusaale ahaan waxaas ayeynu uga doodi doonnaa xoogaana wey inoo diyaarsan yihiin.
Waxaynu niri bal maantay saarida ha la kala guro oo uu Daahir Afqarshe xoogaa ka qaatay, bal sarida keliya ka dood Dhegaweynow.

Dhegaweyne Saaridii ka doodnay, waana ka sheegeynaa mid waliba meeshuu

galo intaan ka naqaan. Horta duubashi haddaad maqasho waa ninkey u gaadhay oo leh, naguhu ma wada laha, aqalladuna ma wada laha, waxaa jira aqal inta aan la dhisin iyo heeryadaba aan dhaafsiisneyn oo aan duubashiba lahayn baa jira, waxaa jira aqal duubashidu siyaado tayahoo markay wax ku heeryeysato awrtii, waxna dhiskii uga haraya, duubashi kaasaa la yiraahdaa. Kan saddexda sarraab loo sameeyo ee midi dhexda yahay midina labada dhinac yahay ee leys dul saaray ee aqalka hagaajiya, sirrada aad maqasho waa kaa. Mid kale, sheyga aloolka la yiraahdo, naaguhu aqalka waa ila xiraan, naagta wanaagsan ee gaarida ihi waxay dooneysaa marka aqalkaba la soo galo inaan ninkiiba muuqanoo markii foodda la soo gashaba isagoo jiifa durbaba la arag, marka sida qaalibka wuxuu ka shaqeeyaa ila xirkaa oo isgu badiba waa lagu ila xiraa, inta barbar lagaga soo dhiso yaa barbarka kalena udub dhexaadkii yaa dacalka loogu soo xiraa dhegaantii buu leeyahay ku xiranoo ila xirka sheyga keena weeyey. Kebedda, horta aloolkaa waxaa ku sameysan xarig iyo suuf iyo jir oo aqalkoo dhan ka dhexeeya oo dhegaha jil baa gala oo saanta ariga ee la jeexayo jil baa la yiraahdaa magaceedu jilaa waa lagu saadiyaa oo aloolkaa lagu sameeyaa oo dhigahaa lagu maraa magaciisuba jil baa la yiraahdaayoo kamaba haro. Aloolkaa bar waa jil oo orgida yar-yar ee dhalata yaa laga jeexaa, qaarna suuf baa laga sameeyaa, qaarna xarig baa laga sameeyaa oo xarig caadi aha ayaa mar-mar lagu dhex daraa. Kebedduna meyrax duf la yiraahdo oo maleegna la yiraahdo oo ay haweenka dabada ka maleegaanoo ay u qiyaaseen iyo xarig baa iyana lagu sameeyaa, waan la sameyn jirnay, madaxey ka xiraanoo waa ku heesaanoo cunney u sii dhigtaanoo waa dhib badan tahay. “*Naagta kebedda lahey kaalin daraney adaan keyd u soo dhigan*” bay is yiraahdaan markay ku heesayaan “*Koronkor cunimeyno oo kari meynee karuur geel ma la hayaa*” na wey yiraahdaan. Xarkaha, kor xarig bay ka yihiin magacyeyna kala leeyihiin, qaar yeel baa la yiraahdaa, qaar cayn baa la yiraahdaa, qaar waxaa la yiraahdaa gibilxeer, qaar beyd baa la yiraahdaa, qaar waa maroo waa xariggaa aqlka ay ku maraan oo ay dhigaha ku maraan, qaarba meel buu ka shaqeeyaa, mid hoggaan baa la yiraahdaayoo waa ta awrta lagu hoggaamiyo, mid dabar baa la yiraahdaayoo waa kan lagu dabraa, midba meel buu ka shaqeeyaa, dhegaati mid la yiraahdaa jira, dheegaatigaas wax allaa wixii aqalkaa saran shey walbaa wuxuu kaga xiran yahay faruurta, aloolkuu ku xiran yahay oo hararaduu ku xiran yahay oo kebedduu ku xiran yahay, oo sheygii kor loo qaadaba dhegaatigaasu ku xiran yahay, aqalkana sheygii kor loo qaadaba xarig baa ku xiran oo ka lalmada oo haddaan xarigaasi ku xirneyn la rari kari mayo. Horta inta aan ka naqaan waxyaabahaasan ka gaarnay.

Axmed Nuur — Waxaan dib ugu noqonayaa ninka la yiraahdo Fiqi Buraale. Fiqi Buraalow waxa kan la yiraahdo suradda ee wax la suro oo haan leh, oo hub leh, oo dhar leh, oo xarig leh, oo guriga gudihiisa waxa la suro, gurigaa labadaryaalaha ah oo weyn oo arooska loo sameeyey oo gabadha loo soo galbin doono iyo wiilka maxaad oran

lahayd.

Fiqi Buraale Taas horta waxaa la yiraahdaa surayo, halkan magaalada waxaa laga yiraahdaa takabaan, waa af shisheeye, innagu afkeenu waxa weeye surayo, surayadaas marka aqal la dhiso oo aqalladu wey kala duduwan yihiinee, aqalka siduu u kala dhar badan yahay ama u kala hab wanaagsan yahay ayey surayadu ka soo baxdaa, surayadaas waxa la surayana waxa weeye aqalkii waa la dhisay marka la dhisana ama wuxuu leeyahay udbo farraara leh ama wuxuu leeyahay ligligyo haamaha ku waxaysan ama wuxuu leeyahay dhigo iyaguna wanwanaagsanoo dhinacyada ka saaran, markaas reer miyiga waanu garaneynaayoo dhar badan saas u sursuran ma ay laha laakiin waxa wax la suraayaa waxaa weeyey weelkii yaryaraa ee muleenka la oran jiray, weelkaasi marka muxuu noqonaayaa, bil matal waxaa ka mid ah dhiisha wax lagu kaydiyo oo odayga markuu maqan yahay dhiishaas iyada dhiil oday la yiraahdoo halkaa iska suran, oo waxaa la suraayaa udubkaas. Waa kow, waxaa jirta mid kaloo iyana la yiraahdo dhiil quraan oo dhiisha dhowrtada la yiraahdoo marka caanihii lagu soo waxeeyaa halkaa la iska dhigaa oo la yiraa marti haddii ay timaado ama marka alaab la sameynaayo oo beel badani halkaa iskaga dhowdahay oo maalinta toddobaad ee la isugu tegaayo baa la qaadaa oo la geeyaa. Waxaa jira bahalkan isagana jiraabka la yiraahdo, kaasoo haweenku had iyo goorba ay wax ku ritaan, ama saqaf ha ku riteen, ama geeddi ha ku riteen, ama wax kastaba ha ku riteene taasina surayadey ka mid tahay. Waxaa jira isna Bohli, jiraabka iyo bohligu waana isku mid waana kala duwan yihiin, midna waa mid guriga iska jooga oo halkaa wax lagu suraa, midna waxa weeye sidii boorsadii bey ka dhigan tahayoo markay gabdhuhu ariga raacaan yaa waxay soo sameeyaan wax qaraab la yiraahdo, qaraabkaas ay soo sameynayaan waxaa jirta in ay dhir galool ah arkaan oo ay diirtaan, markay diiraan meyraxdaa yey calaaliyaan markaasey soohaan markaasey geedi ka dhigtaan, geedigaas ay soohayaan markuu u soo buuxsamo halkaasey ku kaydsadaan. Waa kow, waxaa kaloo jira jiraabkaa lagu ridayaa, madiishaa lagu ridaa, muducaa lagu ridaa, maxaarkaa lagu ridaa, waxyaabahaasoo dhan muleenkii ayuu ka mid yahay laakiin waa qeyb aan dhulka la dhigin ee la suro had iyo goor gadowyadaa teedsan ee faraha badan leh. Wixii dhar ah oo aan markaas la qaadaneynin ee maalin la rabo in la qaatana waxaa lagu ritaa abxada oo sanduuq ka dhigan. Waa kow, waxaa jirta mid kale oo Xashin la yiraahdo, xashinta dhar laguma rido laakiin wixii raashin ahee dibedda laga keeno oo ama miro leh ama yicib leh ama miseggo leh oo kaydka gurigey ka mid tahay iyaduna. Bariidka iyada laguma shubo, laakiin bariidku waa iska gooni isagu. Wixii surayo la yiraahdaa waa waxaa fudud ee ama haragga laga sameeyey ama meyrax laga sameeyey ama orgi noqonaya oo haraggii laga sameeyey oo la tolay kuwaasaa horta surayo la yiraahdaa. Waxaa kaloo soo raaca masafta ama gunadda la yiraahdo ama kuwan yaryaree gunadda ahee magaalada xaggeeda ka yimaada ee cawda laga sameeyo oo tolliin ah oo haweenku ku kaydsadaan indhakuusha iyo alaabtaa yaryar ee

iyaga nadaafadooda ku saabsan ay ku ritaan iyaguna, marka kuwaasaa la yiraahdaa surayo, surayadaasuna waxay ka soo dhex baxdaa muleenkii aqalka dhexdiisa ahaa oo marka awrkii la raro iyagu ma laha ligligyo is qabsanaya, markii la raro awrkii xaas-walwaalka ahaa ee haamaha iyo qumbayaasha iyo tebedaha iyo gembisaha, gembisaha waxa weeye saab la sameeyey oo qurux loo yeelay ayaa lagu sameeyaa xarig qurux badan oo la aslay ama lagu sameeyaa xarig xoolaad afkiisana waa la simaa, isna liglig buu yeelanayaa, kuwaas markii awrkii xaas-walwaalka ahaa lagu teediyoo la raraayo yaa hintii aan idiin sheegay ee siddaha lahayd yaa misana la sursuraa, waa meesha la yiraahdo "Hebelow waxaan wataa dhiil caana teel ehe awrka ii taar" ii sur weeye macnaha, kolkaasa la surayaa haan ligligeed ama ubbo ligligeed hadba kii adag ileen waa buuxdaa dhiishuye. Inta surayada la yiraa waa intaa, qeybta ka soo dhex baxda guriga dhexdiisa ee aan iyadu geleynin teedka dhulka ah. Intaasaa surayo la yiraahdaa.

Axmed Nuur: Innagoo aan moodayo in aanu ku wada ayidi doonno goonigoonina erayada qaarkood u qaadan donna ayaan u wareegayaa dhinaca gurgurka oo Daahir Afqarshe haddaayow qeyb weyn ka qaatay, haddana waan ku celin doonaa, bal aan u deyno Fiqi Buraale qeybta la yiraahdo surayada, qeybaha guud ee gurgurka maxaad ka oran lahayd Daahir Afqarshow.

Daahir Afqarshe: Mahadsanid, Gurgur waxaan kuu sheegay markii hore aqalkii markuu qeybsamay waa anigii ku iri Gurgur iyo Saari, saariguna waa wixii dhisan gurgurkuna waa wixii hoos yaalla, labadaa qeybood waa anigii u kala qaaday, markaa gurgurkii noocyadiisii way badan yihiin, lambar wan (one) waxaa u ah haamaha oo qaarna ay biyaha leeyihiin qaarna ay caanaha leeyihiin. Haanta caanaha biyo laguma shubo iyadoo saban abaar ah dhacdoo khatar la galo maahee oo way ku xumaaneysaa oo labadaa waa la kala ilaaliyaa, tan weyn waxaa la yiraahdaa dhoon oo waa dhaan horaad, halka aan ka kala sheegeynay oo dhoontaasi ama waa lagu lushaa ama biyahaa lagu dhaansadaa, markaas dhoon horaaddaasaa lambar wan (One) u ah. Dhoon dambeed baa ku xigta, marka awrka la rarayo weeye. Haan kale oo saddexaad oo awrku hadduu dhaansan yahay wax harraadanna kaa hor yimaadaan iyo dadka dhaanka wadaaba ay cabbaan oo xagga dambe kaga xiranna wey jirtaa oo saddexaad. Haamahaasaa horta lambar wan (one) u ah, ha kala yaryaraadeen, ha kala waaweynaadeene, midba waqti ayaa loo baahanayaa goor walba caanuhu islama eka, goor walba biyo badan oo la dhaansado looma baahna, mid waliba xilliga ay leedahay baa la doonayaa lagu manaafacaado. Dhoon horaadda tan horee biyaha ah, marka biyaha halkan Ceel Gaab oo kalaa laga soo qaadanayaa awr loo rari maayo haan wasdaan ah oo hooyadu qaadan karto ayey markaa u baahan tahay oo ay ka soo biyeysato balligakan ku dhow. Horta haamahaasaa lambar wan (one) u ah. Waxaa ku xiga waxan la yiraahdo baaharada ama ubbada ninba siduu u yaqaanno ee subagga lagu shubto ee laga beero galbeed ee aqalkeena markaa

ugu quruxda badan leh ee sidaa loo safo aqalka qaaliga ahee la doonayo in laysku xarrageysiiyo. Waakan uu leeyahay “Ubbo baarra sabciinahoo askar feylan la moodoo ingiriisa la moodo”, marka uu ninku geeraarka ku tirinayey, sidaa loo safoo dabadeedna aqalka qaaliga ah, saasoo kale ayaa loo safaa baarrahadaas oo dhar cad inta lagu sameeyey iyo xarig, dhanna ka guduudan dhanna ka cadoo xarig Saab Caarra la yiraahdo lagu sameeyo oo haddana maro kale lagu gadbo oo cad haddana habaaska lagaga qarinayo, saabkeediina la wada aslay, meeriska ugu sareeyana maro Maxamuudi ah lagu sameeyey xoolana laga buuxiyey oo muqmad iyo maxawish iyo dabadeed ay ka buuxdo oo dabadeed tacabkii soomaaliyeed uu halkaa ku dhan yahay, kuwaasaa markaa ku xiga oo waa ubbooyinka. Reerka aan waxaasoo kale kicin kareynin waxaa halkaa u gala waxa la yiraahdo Gogga, gogna waa la yiraa Qumbena waa la yiraahdaa. Gog waxaa loo leeyahay waa gog geeloo sidii aan markii hore idiin sheegayey, saddex gees oo isdhaafsan inta loo sameeyey oo qori loo qoray oo geed mirooda oo aan jabeyn oo la ogyahay, saddexda lays weydaariyey ayaa la qaadayaayoo sidii aan idiin sheegay xarig yar lagu xirayaa markaasaa halkaa laga laalaadinaayaa geed jirridii saa u fooraro oo aan waxba taabaneyn, camuudna markaasaa laga buuxinayaa wanaagsan oo saafi ah oo meel laga soo guray, markaasaa lagu jugeynayaa meel walba oo wuu simmayaa oo wuxuu noqonayaa waxaan meelnaba ka dabacsaneyn kolkaasuu halkaa ku qallalayaa isaga iyo camuuddiisii, hadhowna waa laga soo daadinayaa markaasaa dabadeed gacanta la marinayaa, kolka la ogaado in wax camuudi ku harin oo laga shaqeeyoo haweeney wax taqaanna ay ka shaqeyso , ayaa markaa subag lagu soo dhaqdhaqayaa, halkaasaa loo sameynayaa saabkiisii iyo xarkihiisii, subagii baa lagu shubayaa, shardi waxaa ah subagga oo kulul inaan lagu shubin illaa waa saanoo wuu gubanayaaye, xoogaa yar oo qandaca yaa laga yar dhigayaa markaasaa lagu shubayaa, haddii subag hore ku jiray oo kan dambe lagu shubana waxba ka dhibi maayo kii horaa hoos sii fariistay oo wax walba waa ka adag yahay oo hadduu awrku la bubo waxba ma noqdo, teneggan iyo ubbadan iyo waxan kaloo dhan wey jabayaan, afkana waa laga adkeeyoo ma daadin karo, hooyaa ka shaqeysay taqaan cilmigaas sidiisa kalena waa taa yaroo waxba noqon mayo, raasamaal rasmi kaasaa ah gog baa la yiraahdaa waa saantii geela qumbena waa la yiraahdaa, labadaa magacba wuu leeyahay. Waxaa kaloo wehliya mid ka yar kaas oo laga sameeyey haragga ariga kebbed baa kaas la yiraahdaa waana isku nooc sida loo sameeyey, sidii oo kale yuu u sameysan yahay laakiin labadii saamood ee uu ku kala sameysnaa iyo sida ay u kala yar yihiin, marka midna waa gogga midna waa kebeddaa, markii hore kuwa aan lahaan jirnay kuwaa weeyey, hadda teneggaa baddelay. Tanaggu waxba manaafacaad caynkaas ah ma laha oo markiiba waa jabaa haddii awrku la bubo laakiin isaguna waa lagu manaafacaadaa haddaa waxaas is baddeleen. Waxaan kaloo subagga aanu ku shubannaa baarahadii aan idiin sheegeynay oo waxaa lagu shubtaa subagga iyo muqmadda iyo wixii raasulmaal ah ee reerku u dhiganayo. Waxaa

oo dhan tanaggaa waa lagaga wanaagsan yahay laga sameeyey daasadda oo kuwa kale ayaa kaga wanaagsan oo hooyadu waxay tiraahdaa subagga tenegga sannadkan in la cuno, laakiin haddi ay dooneyso subag guunyo an in ay dhigato waa inuu ubbada ku jiro ama waa inuu qumbaha ku jiro ama waa inuu gogga ku jiro, kan guunyada ahi waa maxay? Waa kan saddex jirka ah iyo wixii ka sarreeya, weligiiba wuu sii wanaagsanaanayaa, markaasuu guduud isku rogayaa marka dambe. Markaa dabadeed dad yar uunbaa haysta oo xoolaley ah oo Ilaahay markii horaba qani ka dhigay.
Alaabta sidey u kala waaweyn tahay sidaa weeye biyaha iyo caanaha iyo subagga wixii lagu qabsanayey waxa kale waa ka soo hooseeyaanoo tallaabo tallaabo ayaa loo soo qaadayaa. Inta waaweyni intaan ka xusuusnahay intaa weeye. Waxaa kaloo jira dhiilihii waa tuu Fiqi Buraale idiin sheegay. Dhiilihii iyo wax Allaale iyo wixii la mid ihi ee surayo la yiraahdaa waa in ay marka hore leeyihiin side waana gurgurkey ka mid yihiin, waxaa u shardi ah in waxaasi surayo la leeyahay uu marka hor sidda leeyahay surmaya meeshii illeen waxaan lahayni meel kuu qaban maayee, dabadeedna waxaasi oo dhan waa dhiileey waa haruub gaalka waa qarro waa doobiga geela lagu maalo waa kan ariga lagu maalo waa kan lo'da lagu maalo, waxaas oo dhan oo kala jaad-jaad ah, waa fujaanka satiyada leh muqmadda isagana lagu rito, waxaasoo dhan marka hore meel wax la suro waa in uu leeyahay dabadeedna surayana waa la yiraahdaa siddana waa in uu leeyahay, markaasaa dabadeedna sheeyadaa waaweyn ee saababka ah ee ee gilgilka wada leh ayaa la surayaa dabadeedna qurux miiran ayuu noqonayaa, awrka marka la rarana saasoo kale ayaa loo surayaa, marka la safo ayaa awrka qurux yaalanayaa oo isku dheelli tirmayaa midba meeshii uu ku habboonaa ay hooyadu geyneysaa markaasey gibilxeerkii ku dhufaneysaa, dabadeed ha la hadlin weeye. Waa la garanayaa, iyada qudheedaa kaas wuxuu doonayaa xannaano oo gabadha rari taqaan baa la garanayaa siduu isugu wada miisaaman yahay, wax waliba waxay ka soo wada baxayaan qof waliba farsamadiisa ayuunbaa lagu qiimeynayaa.

Axmed Nuur: Daahirow adigaa ku watee, waxaan ku weydiin lahaa safadka, satiga, waxakan la yiraahdo, alaabta yaryarka ahee wax lagu cuno, fandhaalka, dibadayaha kuwaasi sow gurgurka ka mid ma aha?

Daahir Afqarshe: Maya Muleen baa la yiraahdaa, dhallinyaranimadaa kuugu wacane kuwaasi waa wax meel lagu ridaa iyagu goonidooda isuma taagaan. Surayada waxaa ka mid noqon kara masafta, waxay leedahay sidde wixii sidde leh uun baa meel surmaya. Abxaddu iyada gurgurkey ka dhigan tahay shey qaali ah weeye. (soo dhexgal) Kolaygu waa caw oo waa geedka alaabada weyn lagu ritaa ee badan, Waxaa kaloo jira geed kaloo la yiraahdo abxad, labada aqal ee isku dhow ee reer magaalaha iyo miyigaba wada ahi labada hooyo ee midina sanduuqa leedahay birta midina abxadda leedahay, waxay oraneysaa "Ina adeerey iigu rid abxaddaada", dharkan xariirta ah sanduuqa weyga cunayaaye,

abxaddu shey qaali ah weeye, waa caw waaweyn oo la sameeyey, harag baa lagu muday markaas la magdeeyey oo suuna oo lagu qurxiyey, galka saraa markaa loo tegeyoo bahal la yiraahdo aleel ayaa lagu xardhay, markaasaa hadhowna shey kale lagu qaadayaa marka la rarayo. "Sidii aqal weyn oo ardaaya leh oo abxadi taal uura raacatow" waa tan saca lagu amaanyo haddii bahashaas galkeedii laga saaray oo aqalka safan yahay waa abxadoo geedka ugu quruxda badanoo hadda sanduuqaa baddaley sidii ubbadaba aan idiin sheegayee sanduuqa baddaley ayey sanduuqa baddashay oo waa laba laysku abburayo marka daboolka laga qaadayana udgoonka markaasaa tacajab u dhimaneysaa, agtiisa ka kac ma oraneysid. Marka waxaas oo dhan waxaa hoosta kaga jiraa muleen la yiraa ma aanan taaban, sheeyadii yaryaraa baanu taabanee bal muleenka Fiqi Buraale weyddii.

Axmed Nuur — Waan kugu soo socdaaye weli waxaanan ka dhergin wax kaleeto. Saddex eray baynu kala guri doonnaa ama afar erayba, ninka Fiqi Buraale aan ula guuxayaa, afartaa eray waxay kala yihiin, erayga koowaad wuxuu yahay Gurgur baa halakan waxaan rabaa gooni in aad u macneyso, muleenna in aad macneyso ood kala saarto, agab ama alaab, magaad, afartaa eray oo macnahoodu is galo Fiqi Buraalaan ku horreynayaaye bal afartaa isku macnaha ama haddii ay kala duwan yihiin iyo waxay ku kala duwan yihiin noo kala gur.

Fiqi Buraale — Horta gurgur sida uu Aw Daahir u yiri yaan la qabaa kuna noqon mayo. Gurgur laguu sheegyey, waxaa la yiri waa haan la tolay ama qori ha laga sameeyo ama ha la tolee, wixii jabaaya ama wax ha lagu ritee ama wax lagu dhaansado ama wax ha lagu cabbo oo waaweynoo wax lagu shubto yaa horta gurgur la yiraahdaa. Ta kalena waa ta la yiraahdo awrka gurgurka, gurgurkaa waxaa la saaraa awrka la yiraa xaaswalwaal, waa awrka isagu iska deggen ee reerkaba uusan ka guuri karin ee reerku ku dhisan yahay, marka awrkaas iyo gurgurkaas wey is eeganayaan, maxaa yeelay waxa gurgur la yiraahdo awr layliya lama saari karo ee waxaa la saaraa awrka xaaswalwaalka ah, maxaa yeelay wax kala go'aaya iyo wax jabaaya ayey leeyihiin. Marka la leeyahay wax kala go'aaya, haantu ma kala jabto ee waa kala go'daa, wixii tolliin ahi waa kala go'aan ee ma kala jabaan. Wixii ubba ah oo qori ah ama ha la qoro ama kuwaa galbeedka laga keeno ha ahaadeenoo sida ubbooyinka, mid yar baa jirta oo la yiraahdo dhuulo oo ku saddex ah. Midi waxa weeye baaradaa weyn ee aan la taabanin oo lala sugo waqti xumaaday, intaa hoostaa laga soo cunayaa waxaa, dhuuladu waxa weeye mid yaroo aan taa weyn gaarin tan labaadna aan gaarin ee tu saddexaad ah oo taas marka la quraacanaayo iyo ayaa la sii cunaa, markaasaa lagu xijiyaa taa kale ubbada ah, baaradaa waqti jiilaal ah oo xumaaday loo tagaa, subaggaa badiba lagu keydiyaa wax kastaba ha raaceenee, subagga la lulay ee la shiilay ee sixinta la yiraahdo yaa lagu ridaa, subagga kale wixii taa ka soo hara ayaa lagu shubaa oo saasaa loo waxeeyaa. Waxaan kaga baxayaa gurgur waxaa weeye wixii jabaaya wixii lagu rido ama ha ku jireene, iyagoo isku jiraa la yiraahdaa gurgur, ama haan ha ahaadeen ama

ubbo ha ahaadeen ama baara ha ahaadeen ama qumbo ha ahaadeen ama harag ha ka sameysanaadeen ama qori ha ka sameysnaadeen ama tolliin ha ka sameysnaadeen gurgur baa la yiraahdaa. Gurgur maxaa marka loo yiri, bil matal markii aqalka la dhisaayo aqalka guradiisa yaa lagu tiiriyaa, dhinacyadaa lagaga tiirshaa, marka aqalkii lagu tiiriyey guradiisii waa kaa gurgurkii, awrkiina waa lagu gurguriyayoo hareerahaa laga saaray. Gurgur iyagoo isku jimleysan ayaa horta la isku yiraahdaa. Magaad iyo muleenna waa isku hal. Muleen waxaa la yiraahdaa wixii wax lagu cabbo, ama wax lagu dhamo Kirli leh (jalmad iyo ibriiqna waa la yiraahdaa), Xeero sibidi leh, Xeero balaadh leh, Dhulo leh, Fandhaal leh, Bixiye leh, Dhiil leh, Haruub gaal leh, Qarog leh, Bire leh, Doogi leh, Mudac iyo Middi leh waxaasoo dhan waxaa la isku yiraahdaa Muleen.

Axmed Nuur: Fiqi Buraalow adigaa ku watee, marka ay Maryan na leedahay reer halkan ah ayaa xalay la muleensaday maxay ula jeeddaa?

Fiqi Buraale: Waxay ula jeeddaa, wixii aan haystay oo idil ee aqalkaa hoose waa la wada gurtay nag baa laga siiyey oo xalay baa la iga gurtay oo waxba laygama reebin. Magaadna waa la yiraa.
Agab baa marka kuu timid, aqabi waa magac guud, bil matal halkay agabtu inoo tiil, waa meel aad wax ku hubsan jirtay oo agabtaasi taasey ka mid tahay, maxaa yeelay waa laga soo shaqeeyey, waa la soohay oo waa la qoray oo waa la eebeeyey oo waa la karay oo nooc walba waa loo sameeyey, marka waxaa la yiraahdaa agabtii meeshii ay inoo tiilay markaas wax walba waa ku dhan yihiin.

Axmed Nuur: Oo ma waxaad i leedahay agabtu wey ka sii weyntahayoo alaabtii wey wada galeysaa? Marka ninku leeyahay “Anaa meel aan laga oon baxayn agabtu ii taal” macnaha alaabtoo dhan baa ii taalloo wixii oo dhan baa ii yaalla buu leeyahay.

Fiqi Buraale: Haa, waa saas.

Axmed Nuur: Waxaan u gudbayaa saddexdii eray, gurgur iyo muleen iyo magaad iyo agab ama alaab bal Daahir Aqfarshow adiguna sidaad u arkeyso afartaa eray kala gur.

Daahir Afqarshe: Intuba horta sidaa loo sheegay weeyaanoo aniguna waan raacsanahay, haddeynu sii wadno marka la maqlo gurigii waa la muleensaday, naagta liidata alaabtaa yaryar iyo waxaasey qaadataa marka ay reerka ka duddo, naagta fariidda ahina waxay tiraahdaa kolley waa lagu soo celinayaaye yey kaa dayacmine haddii la yiraahdo gurigii wey muleensatay, xargaha qaaliga ahee xoolaha ayey qaadayaa ee ogow inaaney isku mid ahayn, midi dharkeeda iyo alaabada yaryar iyo waxaasey markey duddo qaadataa ee ay xambaaran kareyso oo reerka ka tagtaa, naagta fariidda ahina waxay qaadataa xariggii aan oran jirnay xarig yeel ee subkanaa ee xoolaha laga sameeyey ee sidaa isugu wada marnaa

kaasey qaadataa oo dabadeed tiraahdaa yuuna kaa dayacmid intaad guriga ka maqan tahay, waa kinsi, reerka dabadeed wey ka tagtayoo hebla wey muleensatay, markaa waxaad ogaaneysaa xarigii oo idil in ay qaadatay xoolaha ee laba gabdhood oo is dhalay gabowsanayey oo aynaan markii hore taaban, kow. Mar kale haddeynu u soo noqonno gurgurkii waxaynu taaban sheygii ugu qaalisanaa oo ahaa dherigii adari laga keeni jiray ee neef dhan inta lagu rido inta uu muunmuuniyo udgoonka iyo soortoo aan sii qaban kareynin yeynaan taabanba oo beryahanoo dhan wax silica oo bestii ah oo isku da'aya oo soomaali waxan ay cudurrada badan ka qaaday ka mid yihiin yeynu ilownay, waxaynu ilownay kii kalee isaga ka yaraa ee dheelka ahaa (...).